

FAAFINTA

RASMIGA

الرسمية



الجريدة

**DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA**  
لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 13-aad. Garowe November 30, 2011

Lam.11

Faafinta bil walba soo baxda

جريدة الشهرية

**Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland**

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudahiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

**TUSMADA**

**Qaybta Koowaad**

**Sharciga Aftida Dastuurka Dawladda Puntland**

**Qaybta labaad**

**Xeer**

**Waxba ma leh**

**Qeybta Saddexaad**

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.

**Waxba ma leh**

**Sharci Lr 09. ee 30/11/2011, kuna saabsan Xeerka Aftida Dastuurka Puntland.**

DOWLADDA PUNTLAND  
EE SOOMAALIYA



ولاية بونت لاند الصومالية

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

**Sharci Lr.09 ee November 29, 2011, kuna saabsan Xeerka Aftida Dastuurka Dawladda Puntland.**

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPL/123/2011 ee 26/11/2011;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda Xeerka Aftida Dastuurku u leeyahay DPL.

**Wuxuu soo saaray**

Xeerkan soo socda:

Qodobka 1-aad


Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Xeerka Aftida Dastuurka Dawladda Puntland.

Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.


Qodobka 3-aad

Dhaqangalka xeerkani wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga bilaabo maalintu faafinta rasmiga ah ee Dawladda ku soo baxay,

  
Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud  
Madaxweynaha Dawladda Puntland



DAWLADDA PUNTLAND  
EE SOMALIYA



PUNTLAND STATE OF  
SOMALIA

GOLAHA WAKIILLADA

HOUSE OF REPRESENTATIVES

Xafiiska Guddoomiyaha

Office of the Speaker

Ref:- XGGW/DPL / 123 /2011

Garoowe,Sabti

Date:- 26/11/2011

Ku:- Madaxweynaha DPL

Garoowe

Ujeeddo:- Ansixinta Xeerka Aftida Dastuurka Puntland

Guddoomiyaha Golaha Wakiiladdu:-

MARKUU ARKAY;-

Dastuurka DPL Qodobkiisa 64-aad.

MARKUU ARKAY;-

Soo gudbinta Madaxweynaha

MW/DPS/1297/2011 ee 12/11/2011 kuna  
saabsan Xeerka Aftida Dastuurka Puntland

MARKUU TIXGELIYEY:-

Baahida loo qabo Xeerkan.

MARKUU DHAGEYSTAY:-

Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada

WUXUU GUDDOOMIYEY:-

Ansixinta Xeerka Aftida Dastuurka Puntland

Allaa Mahad Leh

Cabdirashiid Maxamed Xirsi

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.





DAWLADDA PUNTLAND  
EE SOOMAALIYA



PUNTLAND STATE OF  
SOMALIA

145

Xeer LR

Kuna saabsan

# **XEERKA**

## **AFTIDA DASTUURKA DAWLADA PUNTLAND**

Xafiiska Guddiga Doorashooyinka Dawladda Puntland ee ku meel gaark ah

(GDP-KMG)

October 31, 2011

**XUBINTA 1-AAD****TILMAAMAHA GUUD****QODOBKA 1AAD****AFTI DASTUUR OO KOOBAN**

- 1.1 Dastuurku wuxuu si rasmiya u dhaqan-galayaa marka lagu ogolaado afti dadweyne, aftidaas waxaa loo qaadi karaa si baahsan ama si kooban. Sida ku xusan Dastuurka DPL qodobkiisa 141 faqradiisa 1-aad, oo tilmaamaysa in dastuurka lagu ansixin karo afti kooban. (Shirweyne Ergooyin)
- 1.2 Taariikhda Aftida Dastuurka ay dhacayso iyo muddada uu soconayo waxaa soo go' aaminaya Guddiga Doorashooyinka Puntland waxayna u gudbinayaan Madaxweynaha si uu dikreeto ugu soo saaro.
- 1.3 Marka la ansixiyo Xeerka aftida dastuurka, Guddiga Doorashooyinka Puntland wuxuu sameyanayaa ololaha baahinta dastuurka.

**QODOBKA 2-AAD****QAABKA XULASHADA ERGOOYINKA AFTIDA DASTUURKA**

- 2.1 Ergooyinga waxaa laga soo xulayaa dhammaan qaybaha kala duwan ee Bulshada Puntland iyo Dawladda.
- 2.2 Tirada ergooyinga oo dhan 480 kana imaaneysa gobolladda dalka iyo degmooyinkiisa waxa soo saari doona Guddiga Doorashooyinka Puntland hal bil ka hor taariikhda la qabanayo Aftida Dastuurka waxayna u gudbinayaan Madaxweynaha si uu dikreeto ugu soo saaro
- 2.3 Guddiga Doorashada Puntland wuxuu soo saari doonaa qoondeyn ergooyinka sida haweenka 20 %, (80% kale waxay ka kala imanayaan qeybaha kale ee bulshada iyo Dawladda).
- 2.4 Shuruudaha xulashada xubnaha ka mid noqononaya ergooyinka waxaa soo diyaarinaya Gudiga Doorashooyinka oo ay la shaqeynayaan Wasaaradaha Arimaha Gudaha, Amniga iyo Arimaha Haweenka iyo Qoyska.

**QODOBKA 3-aad**  
**QAABKA AFTIDA**

Qaabka aftidu waa gacan taag, waxayna ku ansaxaysaa cod dheeri

**XUBINTA 2-AAD**  
**HAY'ADAHA AFTIDA**

**QODOBKA 4-AAD**  
**HAY'ADAHA AFTIDA**

Hayadaha aftidu waa:-

Xubnaha Guddiga Doorashada Puntland oo kaashanaya hay'adaha dawladda Puntland ee ay khuseyso aftida ayaa soo saaraya Guddiga Diyaarinta Aftida.

**QODOBKA 5-AAD**  
**HAWLAHA GOGOLDHIGA**

Guddiga Diyaarinta Aftidu wuxuu diyaarinayaa Goobta Shirweyanaha Aftida iyo agabka loo baahan yahay.

**QODOBAK 6-AAD**  
**AWOODDA, ILAALINTA NABADGELYADA IYO LA SOCOSHADA**  
**XAALADDA GUUD EE SHIRWEYANAHA IYO GOOBTA AFTIDA**

Wasaaraddaha Arimaha Gudaha iyo Amniga waxay si wadajir ah ugu xilsaaran yihiin sugida amniga iyo habsami u socodka shirka, iyagoo ka tala qaadanaya Guddiga Diyaarinta Aftida Dastuurka.



**QODOBKA 7-AAD**  
**KU DHAWAAQIDDA NATIJADA DOORASHADA**

- 7.1 Ka dib markuu helo diwaannada Doorashada ee shireyweynaha oo dhan, Guddiga Doorashadu wuxuu ku dhaqaaqayaa hawlaha soo socda:
- b) Wuxuu tirinayaa guud ahaan codadka.
  - t) Gudoomiyaha Gudiga Doorashadu wuxuu ku dhawaaqayaa natiijada ku meel gaarka ah.
  - j) Ka dib wuxuu u gudbinayaa maxkamada sare si ay u sharciyeyso natiijada kama dambeysta ah.

**QODOBKA 8-AAD**  
**DHAQAN GALKA XEERKA**

Xeerkan wuxuu dhaqangalayaa marka uu ansixiyo Golaha Wakiilada Puntland, Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

  
**Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**  
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**



